JUQRAAFI: Cutubka 3aad Su'aalo&jawabo:

1) Qeex kala duwanaashiyaha deeganka?

J) Kala duwanaashiyaha deeganka waxaa loola jeedaa kala duwanaashiyaha noolaha, sida qaab dhismeedka hido sidaha dhirta iyo xoolaha iyo kala duwananta hab dhaqanka .

2) Sheeg muhiimada kala duwanaashiyaha deeganka?

J) Waxey si weyn ukaabta nolosha dunidan aynu ku'noolnahay.

3) Sheeg sababaha keena burburka deegaan ee keymaha dunida ?

J) Shaqadii uu qaban jirey deeganka dabiiciga ah ayaa hoos udhac kuyimid sida, bacraminta cayayaanka ee dalagga iyo awoodda quudin ee carrada iyo awoodda ay kaymaha ulahaayeen yareynta kaarboonka .

4) Falanqee dhibaatada deegaanka iyo saameynta ay kuleedahay maalgashiga ilaha dabiiciga ah .?

J) Dhibaatada deegaanka kuma eka wasakhoobidda deegaanka iyo dhibaatooyinka ka dhasha ee waxaa intaa dheer in kafaa'ideysiga ilaha dabiiciga ah ay taabaneyso, tusaale biyaha macaan inta badan dunida waxaa gaaray wasakhoobidd waxaase intaa udheer in si aan wanagsaneyn loo isticmaalo .

5) Sheeg khatarta deegaan ee ugu badan oo Aadanaha waxyeelleyn karta ?

J) Wasakhowga iyo isbeddelka cimilada waxay horseedeen musiibooyin kadhaca dunida aynu kunoolnahay, iyadoo hadda ay taagantahay cabsi xagga deegaanka ah oo ay kamid tahay wasakhowga iyo baddelka cimilada .

6) Sheeg noocyada wasakhowga deegaanka ?

J) #) Wasakhowga hawada . #) Wasakhowga biyaha . #) Wasakhowga carrada . #) Isbeddelka cimilada . #) Heerkulka dunida oo korodha . #) Keymaha oo la baa'biyo . #) Isbeddelka Hiddaha . #) Saameynta noolaha badda .

7) Waa maxay xaaluf ?

J) Xaalufka waa hoos ku yimaado carrada dhulalka qallalan iyo dhulka biyaha leh, taasoo ka dhalatey isbeddelka cimilada ama howlaha Aadanaha ay kasameeyaan deegaanka .

8) Sheeg qayb kamid ah dhibaatooyinka xaalufka ?

J) Waxaa kamid ah dhibaatooyinka xaalufka: #) Xiddiga roobka oo yaraado iyo abaaro isdaba joog ah . #) Carra guur ka dhasha dabeysha iyo daadadka . #) Dhir la'aantu waxay yaraysaa uumi baxa , waxana ka dhasha roob yari iyo carra guur yareeya miradhalka dhul beereedka . #) Qaab beerashada aan saxneyn .

9) Falanqee xalka ka hortagga xaalufka ?

J) #) In lajoojiyo hab beershada deegaanka khatarta ku ah. #) In laga howlgalo kobcinta waxsoosaarka beeraha iyo kordhinta barwaaqada carrada . #) Adeegsiga nidaam ilaalin kara ilaha biyaha. #) Ilaalinta dhirta. #) Faafinta wacyi deegaanka xafida .

10) Qeex macnaha xarfashada ciida ?

J) carradu waa dahaarka kore ee meeraha dhulka, waxayna ka sameesan tahay burburka dhagaxyada kala duwan.

11) Sheeg sababaha xarfashada carrada?

J) b) waxyaabaha carra guurka keena sida roobka iyo biyaha . t) Baabi'inta dhirta hakin laheyd bacaadka . j) Daaqa oo aan loo meel dayin oon si wanaagsan loo maaraynin. X) Habdhaqanka Aadanaha guracan ee u adeegsiga carrada dhismaha .

12) Falanqee noocyada xarfashada iyo sida loo yareyn karo ?

J) noocyada xarfashada carrada waa laba nooc:

b) xarfashada ay dabeysha keento . t) xarfashada ay biyaha keenaan .

#) Qaabka loo yareyn karo xarfashada:

b) In la sameeyo cilmi baaris buuxda oo ku aadan sababaha xarfashada iyo sida looga hortagi karo . t) In la sameeyo bacaad celin iyada oo la sameynayo dayr lana celinaayo bacaadka .j) In la joojiyo si xun u'isticmaalka carrada. X) In la beero dhir korna loo qaado dhireenta. Kh) In meel lagu ururiyo biyaha iyo daadadka lagana faa'ideysto .

13) Sheeg dhibaatooyinka ugu badan ee ka dhasha daadadka ?

J) #) Khasaarooyin naf iyo maal ah . #) Dhulka oo go'o #) Shaqada oo caqabad ay ku timaado . #) Dhul beereedka iyo xoolaha oo waxyeello soo gaarto . #) Carro guur .

14) sheeg sababaha daadadka iyo sida looga hortagi karo ?

J) Daadadka waxaa keena sababa kala duwan:

b) Deegaanka oo ku fida meelaha daadadka baylaha u ah . t) Carrada oo awoodi weyso in ay dhuuqdo biyaha xad dhaafka ah . j) Dhismayaasha aan nidaamsaneen oo laga dhiso meelaha biyo mareenada ah . X) Daryeel la'aan iyo burbur haleelay biya mareenadii biyaha qaadi jiray .

#) sida looga hortagi karo :

b) Ilaalinta magaalooyinka . t) In dadka loo jiheeyo ka faa'iidaysiga dhul beereedka . j) In lahelo agab bixiyo digniin xili hore. Daryeelka goobaha daadadka u nugul iyo in lasameeyo biya xireeno.

15) Sheeg dhibaatooyinka deegaanka soomaaliya?

J) waxaa jira dhibaatooyin fara badan oo haysta deegaanka soomaaliyeed oo ay ugu horrayso :

#) Jaridda dhirta . #) Duugista wax yaabaha haraaga ah ee kiimikada. #) Abaaraha iyo daadadka oo soo laab laabta .

16) Dhibaatooyinka ugu badan ee kadhasha dhibaatada deegaanka waxaa kamid ah :

#) In ay barakacaan dad badan iyagoo qaxooti ku noqda dibadda magaalada muqdisho. #)Halkas oo ay kala kulmaan dhibaato iyo baahi ay uqabaan gacansiin . #) waxa dhibato kuhayo wasakhoobid oo ah haraaga kiimikada oo ay soo dhoofiyaan warshadaha iyo shirkadaha dalalka dunida .

GOOBO GALI WEERTA SAXDA AH:

1) Haraaga warshadaha iyo beeraha ayaa ah sababta keenta :

b) Wasakhowga carrada. { t } Wasakhowga biyaha. j) Wasakhowga cimilada . X) Wasakhowga hawada .

2) Wasakhowga carrada wuxuu keenaa :

{ b} burburka dhulka t) burburka beeraha j) burburka warshadaha .

3) Adeegsiga shidaalka dhulka laga qodo iyo gaaska hawada lagu sii daayo wuxuu sababaa :

b) qabow fara badan . t) Kuleylka oo yaraado . { j } Kuleylka oo sii kordha .

4) xilligan hadda lajoogo dhirta waxay dabooshaa :

b) 40% dhulka { t } 30% dhulka j) 20% dhulka .

5) Kaymuhu waa ilaha lagahelo :

{ b } oksijiinka t) kaarboonka. j) beeraha .

6) Aadanaha wuxuu adeegsadaa hadda tiknoolojiyada si ay isbeddel ugu sameeyaan :

b) hiddaha xoolaha la dhaqdo. t) hiddaha xayawaanada duur joogta ah. { j } hiddaha dalagga la quuto .

7) Sida dhisidda darbiyo dhaadheer ama tiirar isu dhaw dhaw waxaa loo yaqaan :

b) Teed dhireed. { t } Teedadka adag. j) dallag gedis.

8) Bacaad celinta waxaa ugu haboon :

{ b } dhireynta. t) Teedadka adag. j) dhisidda biyo xireeno.

9) Shirkii Qarammada midoobey ee koowaad oo lagu qaadaa dhigaayay arimaha deegaanka, waxaa laqabtey sannadkii :

b) 1973. { t } 1972. j) 1970 .